

## Xarunta Macaamiisha Länsstrafiken Kronoberg

### Växjö Resecentrum

**Saacadaha furitaanka**

| | |
|---|---|
| Isniinta–Jimcaha | 06.00–19:00 fiidnimo |
| Sabti | 08.00 - 14.00 |
| Axad | 12.00–18.00 |

Macuumaadka xilliyada ka duwan waxaad ka helaysaa lanstrafikenkron.se/vaxjo

Alaabta la helo: 0733-47 79 26

**0771-76 70 76**

**kundcenter@lanstrafikenkron.se**

## Wadajir.
## Ugu socda mustaqbal waara

## Waxaanu beddeleynaa nidaamka tikidhka!

Xilliga deyrta waxa aanu ku beddeli doonaa nidaam tigidhada oo cusub oo ka casrisan. Marka hore waa soo bixi doona app-safarka oo cusub kaas oo aanu horayba suuqa ugu soo galinay, halkaas oo aad qiimo dhimis 10 % ka heli doonto. Isla wakhtigaa app-ka suuqa la soo galinaayo ayaanu 10 % ka dhimnay qiimo dhimista sanduuqa safarka. Waxa aanu beddeli doonnaa mashiinnada tigidhada, waxaan heli doonnaa kaadhadh cusub oo safarka iyo ganacsi internedka. Markaan suuqa soo galino dhammaan qaybaha ayaanu markaas meesha ka saari doonaa Kaadhka safarka ee sanduuqa safarka, laakiin ilaa iyo markaas ayaad sidii caadiga aheyd ugu sii safri kartaa.

Haddii aad sanduuqa socdaalka lacag kuugu hadhsan tahay ayaad u soo wareejin kartaa app-ka safarka ee cusub adigoo soo maraaya koodh qiimaha oo boggayaga internetka ku jira. Waxaad hadhow xataa sanduuqa socdaalka aad sidoo kale u soo wareejin kartaa kaadh cusub oo safarka.

Waxaad haysataa 10 sano si aad lacagta dib uga dalbato sanduuqaaga socdaalka. Koodhka qiimahu waxa uu shaqeyn doonaa 365 maalmood. Qiimaha Sanduuqa socdaalka ee ka hooseeya 10 karoon lama soo celin doono.

Nidaamka tigidhada ee cusub waxaanu ku bixin doonnaa hab lacag bixin oo cusub oo loo yaqaano sanduuqa macmiilka. Kaas waxaad ku shuban kartaa lacag oo aad kadibna ku xidhi kartaa Kaadhka safarka ama app-kaaga safarka.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan nidaamka tigidh lagu bilaabo (biljettsystemetklicka) ee cusub **lanstrafikenkron.se/nyttbiljettsystem** oo guji calaamadaan geeska kore ee midig.

## Waxa wanaagsan in la ogaado

- **Gaadhiga carruurta -** Haddii uu boos banaan jiro ayaa gaadhiga carruurta la qaadan karaa lacag la'aan. Gaadhiga carruurta ee loo isticmaalo wixii aan aheyn carruur in lagu qaado ayaa la bixinayaa kharash la mid ah ka carruurta/da'yarta.
- **Carruurta/da'yarta** Haddii qofka musaafurka ahi uu bixinaayo kharashka carruurta/da'yarta, 0-19 sanno jirka, waa in musaafurku taas dirawelka hore ugu sii sheegaa, haddii kale waxa shaqeynaaya/la bixinayaa tigidhka qofka weyn.
- **Baaskiil -** Waxaad tareenka iyo basaska gobolka la saaran/qaadan karaa baaskiil haddii uu boos banaan yahay. Kharashka baaskiilku waa mid la mid ah ta carruurta/da'yarta. Gaadiidka magaalada dhexdiisa ah ee gobolka Kronobergs län ayaan la ogoleyn in baaskiil la saarto. Waxa la ogol yahay in la soo qaato baaskiilka isku laablaabma, iskooterka korontada, kickbike iyo mikrobike haddii ay wax badan isku wada laablaabmayaan
- **Wax ku cunista gaadiidka guudkiisa** Cunto iyo cabitaan ayaa la soo qaadan karaa iyadoo loogu cuni doono si aan wax dhib ah u keeneynin dadka kale ee musaafuriinta ah iyo inaan waxyeelo la gaadhsiin agabka gaadiidka gobolka iyo kuwa dadka kale ee musaafiriinta ah ay leeyihiin. Dhaawaca noocaas oo kale ah ayuu musaafurku masuul ka yahay. Cabitaanada khamrigu ku jirro waa inaan lagu cabin baska ama tareenka dhexdiisa, meelaha sugitaanka ama meelaha la hadhsado/dhaxanta laga galo.
- **Baadhitaanka/kharashka ganaaxa** - Haddii aanad haysan ama aad sidato tigidh qalad ah marka baadhitaan yimaado waa inaad markaas bixiso ganaax dhan 1200 kr.
- **Xawayaanka wehelka** - Ayga, bisada ama wixii xawayaanka yaryar ah ee kale ayaa la qaadan karaa lacag la'aan haddii aanay wax dhibaato ah u keeneyn dadka kale ee musaafuriinta. Xawayaanku waa inay xilliga safarka gudahiisa xakameysnaadan ama ay ku jiraan shandad ama qafis. Xawayaanka waa inaan la saarin meelaha lagu faadhiisanaayo.
- **Bagaashka gacanta** - Waxaad kharash la'aan qaadan kartaa inta bagaashka gacanta ee aad si dhib yar u qaadi karto. Bagaashka gacantu waa inaanu xidhin marinada dhexe ama aan la jiraan kuraasta lagu fadhiisto dushooda.
- **Cabista sigaarka** - Waa mamnuuc in sigaarka lagu cabo, taasina waxay xataa khuseysaa, sigaarka elektarooniga, basaska, tareenka, goobaha sugitaanka ama meelaha la hadhsado/dhaxanta laga galo.

**Qiimaha tigidhka hal mar** ahee Karoon ahaan loogu talogalay Baska iyo tareenka

| | Qiimaha caadiga ah | | Tigidhada safarka halka mar ah iyo tigidhka app-ka | |
|---|---|---|---|---|
| Tirada aagaga | Carruurta/dhalinyarta 0-19 sanno | Qof weyn Laga bilaabo 20 sanno | Carruurta/dhalinyarta 0-19 sanno | Qof weyn Laga bilaabo 20 sanno |
| 1 | 18 | 30 | 16,20 | 27,00 |
| 2 | 24 | 40 | 21,60 | 36,00 |
| 3 | 30 | 50 | 27,00 | 45,00 |
| 4 | 37 | 62 | 33,30 | 55,80 |
| 5 | 44 | 74 | 39,60 | 66,60 |
| 6 | 52 | 86 | 46,80 | 77,40 |
| 7 | 60 | 100 | 54,00 | 90,00 |
| 8 | 70 | 116 | 63,00 | 104,40 |
| 9 | 76 | 126 | 68,40 | 113,40 |
| 10 | 83 | 138 | 74,40 | 124,20 |
| 11 | 90 | 150 | 81,00 | 135,00 |
| 12+ | 100 | 166 | 90,00 | 149,40 |

## Goobaha iibka

### Alvesta
**Pressbyrån**
Järnvägsstationen
0472-442 25

### Lenhovda
**COOP Konsum**
Storgatan 53
0474-485 40

### Lessebo
**COOP Konsum**
Storgatan 71
0478-100 04

### Ljungby
**Willys förbutik**
Garvaren,
Stationsgatan 2
0372-253 74

### Tingsryd
**Börjes Tingsryd**
Storgatan 66-68
0477-482 00

### Markaryd
**COOP Konsum**
Drottninggatan 28
0433-100 64

### Åseda
**COOP Konsum**
Järnvägsgatan 9
0474-100 16

### Älmhult
**Sydresor AB**
Järnvägsstationen
0476-714 15

### Växjö
**Pressbyrån**
- Växjö Resecentrum
  0470-210 21
- PG Vejdes väg 29
  0470-76 18 75
- Storgatan 7
  0470-72 91 50
- Storgatan 36
  0470-212 71
- Växjö lasarett
  0470-254 29

**Maxi ICA Stormarknad**
Grand Samarkand
Hejaregatan
0470-79 99 00

**Rugta macaamiisha ee Länstrafikens**
**Växjö resecentrum**
0771-767076

*Soomaali Somaliska*

# In lagu safro gaadiidka Länstrafiken Kronoberg
## – bas iyo tareen.

*Wuxuu shaqeynayaa laga bilaabo 31 Ogosto, 2020*



Länstrafiken Kronoberg

## Noocyada tigidhada/Xadka da'da

**Qof weyn**waxa laga tirinayaa da'da 20 sanno ka bilaabmeysa. Markaas waxa shaqeynaaya qiimaha tigidhka ee caadiga ah.
**Carruurta/da'yarta** ilaa iyo 19 sanno jirka waxa la siinayaa qiimo dhimis 40 % oo tigidhka caadiga ee qofka weyn ah.
Musaafurku (qofka safrayaa) waxa uu kooxda da'da badaleyaa maalinta uu 20 sanno jir buuxiyo. Haddii da'da laga shakiyo waa inaad ID-kaadh tusi karto, haddii kale heerka da'da weyn ee ugu dhow ayaad bixinaysaa.
Markaad Denmark u safraysid, ayaa qof weyn laguu xisaabin doonaa isla markaad 16 sanno jir gaadho.

**Carruurta 0–6 sanno jirka** ayaa bilaash ugu safraysa haddii ay qof weyn oo lacag bixinaaya la socdaan (ugu badanaan laba carruur ah qofkii weyn ee kasta ee lacag bixinaayaba). Waxa qof weyn oo lacag bixinaaya loo tirinayaa tigidhka halka mar ah, tigidhka 24- iyo 72 ah, Tikidhka xilliyada ee dadka waaweeyn iyo Tikidhka xilliyada ee ardeyga. Carruurta aan qof weyn oo lacag bixinaaya la socon waxay bixinayaa ta carruurta/da'yarta. Musaafurku waxa uu kooxda da'da badaleyaa maalinta uu 7 sanno jir buuxiyo. Haddii da'da laga shakiyo waa inaad ID-kaadh tusi karto, haddii kale heerka da'da weyn ee ugu dhow ayaad bixinaysaa.

**Tigidhada Duo/Familj** - Kuma khusayso barnaamijka safarka cusub

Tigidhka Duo/Familj waxa uu u shaqeynayaa ilaa shan qof, halkaas oo ay ugu badnaan laba yihiin dadwaaweyn. Qiimaha waa mid 10 % ka raqiisan marka la garab dhigo laba tigidh oo dadka waaweyn ah. Qof weyn ahaan waxa lagu tirinayaa dhamaan dadka buuxiyey 20 sanno jir. Duo/Familj waxa xataa lagu bixin karaa lacagta safarka, taas oo ku siinaysa 10 % qiimo dhimis dheeraad ah. Duo/Familj waxa xataa loo isticmaali karraa safarka gudaha/dhexda Kronoberg, Jönköping, iyo Kalmar län.

## Tigidhka halka mar ah

Safarka tigidhka halka mar ah waxa loogu tallogalay qofka aan badanaa safrin ama qofka meelo kala duduwan u safra.

Qiimaha safarka halka mar ah waxa go'aaminaaya tirada aagaga aad ku safrayso iyo da'da dadka musaafiriinta. Safarka gaadiidka magaalada ee Växjö waxa shaqeynaaya qiimaha aaga 1.

## App-ka safarka

App-kayaga safarka ee Länstrafiken Kronoberg waxaad ka heleysaa qiimo dhimis 10 % ah oo dhamaan tigidhada, ha ahaato hal tigidh- ama kaadhka xilliga waxaadna ku bixin kartaa Swish ama kaadhka bangiga (Visa ama Mastercard). Haddii aad rabto inaad kaadhka bangiga ku bixiso, waa inaad markaas kaa ku dartaa habka lacag bixinta marka aad iibsaneyso ama aad hore ugu sii dartaa. Haddii aad 18 jir ka yar tahay oo aad rabto inaad tigidhada moobaylka isticmaasho, waxaad caawimo uga baahan tahay waalid ama mas'uul si kaas loogu xidho kaadhka bangiga.
App-ka safarka, waxaad sidoo kale ka raadsan kartaa safarka, ka eegi doontaa boosteejada kuugu dhow, ka eegi kartaa gaadiidka basaska oo waqtiga xaadirka ah socda iyadoo xilliyada ay boosteejada ka baxyaan aad ka raadin karto. App-ka kala soo deg App Store ama Play Butik.

**Qiimo dhimista dadka wada socda** - Ku shaqeynaaya app-ka safarka ee cusub

Qiima dhimista dadka wada socda ayaa ku siineysa qiimo dhimis 25% oo sicirka iskugeynta ee tigidhaada marka aad tihiin dhowr qof oo wada safraaya. Qiimo dhimista waxa toos looga goynayaa app-ka safarka markaad iibsato laba tigidh ama wax ka badan.

## Kaadhka safarka

Kaadhka safarka ma aha mid shakhsiga u gaar ah, waxaad deymin/amaaneysiin kartaa saaxiib ama qof qoyska ka mid ah marka aanad adigu isticmaaleyn. Kaadhka safarku waa cadeyntaada safarka waana inaad sidato dhamaan inta aa ku gudo jirto safarka. Waxaad Kaadhka safarka ku shuban kartaa ama kaadhka xilliyada ama sanduuqa socdaalka labadaba.

**Sanduuqa socdaalka**

Kaadhka safarka ee sanduuqa socdaalka waxaad ku iibsaneysaa oo aad ku shubaneysaa lacag boqolaal karoon oo go'an ah, oo 100 karoon ugu yar tahay. Markaad tigidhkaaga safarka halka marka ku bixiso sanduuqa socdaalka ayaad heli doontaa qiimo dhimis 10 % ah. Kaadhka lacagta safarka waxa mid shakhsiga u gaar ah waxaana loo isticmaali karraa safarka Kronoberg, Jönköping iyo Kalmar län gudahooda/dhexdooda ah.

## tigidh 30-maalmood ah

Waad dooran kartaa haddii aad rabto in tigidhkaaga 30-ka maalmood ahi uu sanduuqa socdaalka ahaado ama waxaad tigidhada ka iibsan kartaa app-kayaga safarka. Tigidhku waxa uu ku siinayaa safarro bilaash ah oo muddo 30 maalmood ah masaafada aad doorato waxaana lagu heli karaa gaadiidka magaalada iyo gobalka ee basaska iyo sidoo kale safarka tareenka (Krösatågen, Pågatåg iyo Öresundståg).

Haddii aad tikidhkaaga xilliga aad ku iibsatid app-ka safarka, ayaa isla markiiba laga shaqeysiinayaa haddii aadan adigu dooran in mar dambe laga shaqeysiiyo. Waxaad app-ka ku haysan kartaa tigidh xilliga oo sugaaya muddo 365 maalmood ah.

Markaad iibsato ama aad ku shubato tigidh cusub oo 30 maalmood ah kaarkaaga socdaalka, waa in tigidhka laga shaqeysiiyaa si uu ugu shaqeeyo. Taas waxaad ka sameyn kartaa baska dushiisa, goobahayaga iibka iyo mashiinka tigidhada ee ku yaala maxaddada/boosteejada tareenka.

**Qofka carruurta/da'yarta ah ee u dhaxeeya 0-19 sanno** wuxuu iibsan karaa tigidh 30-maalmood oo Dhalinyaro ah isagoo helaaya qiimo dhimis 25 % ah. Markaad ku safrayso Kaadhka 30-maalmood ee Dhalinyarada waa in ID-kaadh shaqeynaaya la tusaa si da'da loogu xaqiijiyo.

**Tigidhka xilliga firaaqada ee qofka ilaa iyo 19 sanno jirka ah**
Tigidhka xilliga firaaqada waa tigidhada xilli 30-maalmood ah kaas oo shaqeynaaya Isniinta-Jimcaha laga bilaabo saacadaha 14.00- 04.00 iyo habeen iyo maalinba maalmaha Sabtida–Axadda. Maalmaha fasaxa iyo maalmaha waxbarashada inta lagu gudo jiro simistarka wuxuu shaqeynayaa xilliyo la mid ah kuwa maalmaha shaqada. Maalmaha fasaxyada iyo fasaxa isku xiriirsan ayaa xilliga uu shaqeynayaa ay tahay mid la mid ah ta Sabtiyada/Axaddaha.

**Qiimaha kaadhku waa 200 karoon,** markaas oo carruurta iyo dhalinyarada ilaa 19 sanno jirka ay ku safri karaan 30 maalmood bas iyo tareenba gobolka oo dhan. Waxaad tigidhada ka iibsan kartaa *Mina sidor*, baska dhexdiisa, Xarunta Macaamiisha, goobaha iibka iyo app-ka safarka. Tigidhada app-ka waa in lagu soo iibsadaa telefoonka Tigidhka xilliga firaaqada lagu isticmaalaayo.

**Qofka ardeyga ah** ayaa heli doona qiimo dhimis 25 % ah oo tigidhka 30 maalmood ah haddii aad haysato app-ka Mecenatkortet ama Studentkortets oo leh astaan qiimo dhimis ardayda.

Si aad qiimo dhimista ardayda xaq ugu yeelato, waa inaad:
Dhigato waxbarasho lagu qaato deeqda waxbarashada ee heer jaamacadeed, kulliyadeed ama waxbarasho kale oo dadka waaweyn ah. Aad ugu yaraan 50 % wax dhigato iyo muddo 10 toddobaad oo isku xiga hal simistar gudaheed ah.

Marka kantaroolid/baaritaan gaadiidka guudkiisa la sameynaayo waa in aqoonsi ardayga oo shaqeynaaya oo leh sumadda safarka ardayda iyo ID sawir ku yaalo la tusi karaa.

## Sidan ayaad u bixinaysaa safarkaaga baska

- Iyada oo tigidh ahaan ah app-ka safarka. Ka iibso adigoo soo maraaya app-kayaga Länstrafiken Kronoberg.
- Kaadhka Safarka, ayaad ku shubatey xilliga iyo/ama lacagta safarka
- Kaadhka bangiga. Dhamaan basaska Länstrafiken Kronoberg waxa ku yaala mishiin kaadhka bangiga lacagta lagu bixiyo. Waxa lagu isticmaali karaa MasterCard iyo VISA.
- Waxa aad xataa tigidh ka iibsan kartaa Xaruntayada macaamiisha ama xaruntayada- iibka ee u dhow meesha aad ka safrayso, halkaas waxaad ku bixin kartaa kaash, kaadhka bangiga iyo sanduuqa socdaalka.

Safarka sumada ardeynimada

## Sidan ayaad ugu bixinaysaa safarkaaga tareenka (aan aheyn SJ)

- Iyada oo tigidh ahaan ah app-ka safarka. Ka iibso adigoo soo maraaya app-kayaga Länstrafiken Kronoberg.
- Kaadhka Safarka, ee ayaad ku shubatey tigidh laga shageysiiyey/la bilaabey.
- Kaadhka safarka ee lagu shubey lacagta safarka. Tigidhkaaga iibso ka hor inta aanad fuulin. Waxa aad tigidh ka iibsan kartaa Xaruntayada macaamiisha iyo xarunta iibka ee u dhow meesha aad ka safrayso. Kaadhka lacagta safarka waxa loo isticmaali karraa safarka Kronoberg, Jönköpingn iyo Kalmar gudahooda/dhexdooda ah.
- Mashiinka tigidhka ee maxaddada. Tigidhkaaga iibso ka hor inta aanad fuulin. Waxaad ku bixin kartaa Kaadhka safarka ee lacagta safarka ama kaadhka bangiga (VISA/MasterCard/Diners/American Express).

**Mashiinka tigidhka laga eebsado waxa uu ku yaalaa maxaddadaha tareenka ee gobolka oo dhan**

## *Mina sidor* ayaad wax dheeraad ah ka helaysaa

*Mina sidor* waxa weeye adeeg lacag la'aan ah oo boggayaga internedka halkaas oo aad ka helayso adeega ka wanaagsan. Si aad xubin uga noqoto *Mina sidor* ayaad ugu baahan tahay inaad haysato lambarka shakhiga ee Iswiidhishka. Markasta oo aad iibsato tigidh ama aad Kaadhka safarka ku shubato adigoo soo maraaya *Mina sidor* ayaad helaysaa qiimo dhimis 10 % ah ama 10 % qiime dheeraada ah. Kaadhkaaga safarka ka diiwaangali *Mina sidor* markaas ayaad heli doontaa damaanada-hadduu-kaa-lumo.

Fiiro gaara! Waxa dhici karta in ay qaadato 24 saacadood inay lacagtaadu ku soo dhacdo Kaadhkaaga safarka markaad ku shubato adigoo soo maraaya Mina sidor.

Markaad ku shubato adigoo soo maraaya Mina sidor ayay noqon doontaa ku shubasho sugaysa. Si aad ugu shaqeysiisyo/bilowdo ku shubashada waa in marka hore safarka laga bilaabaa gobolka Kronobergs län dhexdiisa. Markaas kadib ayay suurtogal tahay in kaadhka lagu isticmaalo xataa gobolka banaankiisa.

Wax dheeraad ah ka akhri www.lanstrafikenkron.se/minasidor

## Safaro bilaash ah marka la aadayo ama laga imaanayo daryeelka caafimaadka

Qofka weyn ee balan ku leh xarun daryeel caafimaad iyo daryeelka ilkaha ayaa xaq u leh inuu kharash la'aan/bilaash ku soo kaxeysto laba carruur ah oo 6 jir ah ama ka yar. Carruurta ku jirta gaariga carruurta ayaa la soo kaxeysan karaa haddii uu boos banaan yahay.

**Safarka baska**

Bilaash ayaad baska ugu raaci kartaa haddii aad darawalka tustid warqaddaada balanta (kallelse) ee ka socota rugta caafimaad ee gobolka ku taal, iyo ka soo noqodka haddii aad tustid risiidka daryeel bixiyahaaga. Haddii aadan haysan wax warqad balan ah ama aadan rabin inaad tustid taas, ayaad lacagta bixinaysaa iyadoo aad hadhow tigidhka iyo risiidhka daryeel bixiyahaaga oo wada socda aad u soo diri doonto Region Kronoberg, Serviceresor, 351 88 Växjö. Haddii aad tigidhkaaga ka iibsatey app-ka safarka ayaad risiidh u diri kartaa emaylkaaga, soo daabac oo u soo dir cinwaanka kor ku xusan. Region Kronoberg waxa uu kaliya kuu soo celinayaa uun qiimaha safarka baska, waxa loola jeedaa taas waxa lagu bixiyo kaadhka bangiga ama Kaadhka lacagta safarka.

**Safarka tareenka**

Haddii aad doorato inaad safarkaaga daryeelka caafimaadka tareenka u raacdo waa inaad tigidhkaaga sii iibsato safarka ka hor. Si laguugu soo celiyo tigidhkaaga waa inaad isaga u soo dirto iyadoo uu la socdo risiidhka daryeel bixiyahu: Region Kronoberg, Serviceresor, 351 88 Växjö.

## Kaadhka la lumiyay ama googo'ay iyo lacag soo celinta

Adiga ah qofka safraaya ayaa masuul ka ah Kaadhkaaga safarka. Haddii kaadhkaagu aanu shageynaynin cilad farsamo darteed ayaanu kaadhkaga lacag la'aan kaaga badali doonaa Xarumahayaga macaamiisha ama xafiiskayaga.

Haddii uu kaadhkaagu kaa lumo ayaan markaa kaliya kaaga kuu bedeli doonaa uun haddii aad kaas ka diiwaan galisay Mina sidor.

Tigidhada safarka halka mar ah iyo Sanduuqa socdaalka laguuma soo celin karo.

Kaadhka safarka oo leh kaadhka xilliga oo sugaaya waxa lagaaga soo celin doonaa xaruntayada Macaamiisha iyadoo lagaa qaadi doono kharash adeega oo dhan 50 Karoon.

Badalida aagaga ama haddii aad ku cusbooneysiineyso kaadh ka qaalisan, ayaad taas lagu sameyn karaa khaadhka xilliga ee sugaaya iyada oo aan kharashka adeega lagaa qadi doonin

Ku cusbooneysiinta kaadh ka qaalisan waxa lagu sameyn karaa kaadhka xilliga, laakiin xilliga uu shaqeynaayo lama bedeli doono.

Kaadhka safarka ee waqtigiisu shaqaynayo waxa lagu celin karaa sida uu tilmaamayo jadwalka hoose:

| Maalinta uu shaqeynaayo | Dib u bixin % qiimaha kaadhka |
|---|---|
| 1 | 80 % |
| 2 | 60 % |
| 3 | 50 % |
| 4 | 40 % |
| 5 | 30 % |
| 6 | 20 % |
| 7 | 10 % |

